



XAANSHIDA XAQIIQDA

Hawo Nadiifiye

Maxaad ugu baahan kartaa hawo nadiifiye

Dabka kaynta, shooladaha xaabada, sigaarka, iyo qiiqa ka dasho karinta dhammaantood waxay leeyihiin jajabyo yaryar ee ka yimid qiiqa.

Markaad neefsato, jajabyadan waxay geli karaan qulqulka dhiigga waxayna sababi karaan dhibaatooyin caafimaad oo daran. Dadka qaarkiis waxay u nugul yihiin dhibaatooyinka waxyeelada leh ee jajabyada yaryar. Kuwaas waxaa ka mid ah carruurta iyo dadka qaba cudurrada wadnaha ama cudurka sambabada ee raago oo ay ku jirto neefta. Dadka jira 65 ama ka weyn iyo haweenka uurka leh sidoo kale waxay ku jiri karaan khatar sare.

Waxa la sameeyo si loo yareeyo khatarta caafimaad ee qiiqa ka yimaada

Dadka halista ugu jira dhibaatooyinka caafimaad ee daran ee qiiqa waxay guriga ku isticmaali karaan hawo nadiifiyaha si ay u yareeyaan halistooda. Hawada nadiifiyayaashaa waxtarka leh waxaa ka mid ah:

- Nadiifiyayaasha jajab yare haweedka ee Waxtarka sare sare leh (HEPA)
- Nadiifiyaha korantada ee Wasakh saaraha (ESP)

Nadiifiye Iskaa u samayso ah ma jiraa?

Haddii nadiifiyayaasha HEPA ama ESP aan la heli karin, waxaad tixgelin kartaa xulashada Iskaa u samayso (DIY).

- Waxaad samayn kartaa nadiifiyaha Iskaa u samayso (DIY) adoo ku dhejinaya nadiifiyaha foornada sanduuq marawaxadeed .
- Si nadiifiyaha Iskaa u samayso uu waxtar u lahaado, waxaad u baahan doontaa inaad gebi ahaanba dusha marwaxadda ku daboosho HEPA ama lagu qiimeeyay MERV-13 ama ka sareeya.
- Nadiifiyayaasha 3 ilaa 5 inji qaro weyn ayaa ka dheereyn doona kuwa dhuuban.

Maanka ku hay talooyinkan amniga markaad adeegsanayso nadiifiyaha Iskaa u samayso (DIY)

- Aad ayey muhiim u tahay inaad damiso nadiifiyaha markaad guriga ka baxdo.
- Demi oo korontada ka saar marwaxadda oo la xiriir tafaariiqleyaasha ama soo-saaraha haddii aad aragto ur gubanaya ama sawaxan aan caadi ahayn.
- Hubso in gambaleelada digniinta dabka iyo qiiqaaga ay shaqeynayaan.
- Beddel marwaxadda dhowrkii sanaba mar oo beddel nadiifiyayaasha markay wasakhaysato ama xilliga soo-saaruhu kugula taliyo.